

Bipolar Disorder (Arbushka Labada Cirif)

Sidoo kale loo yaqaan: Manic-depressive illness (Xanuunka waallida-niyadjabka)



Xaaladda Bipolar disorder waa xanuun maskaxeed oo halis ah. Dadka qabaa waxay maraan isbeddelo muudh oo aan caadi ahayn.

Waxay ka tagaan farxad badan, "sarrayn" iyo firfircooni ilaa murugo badnaan iyo rajo-beel, "hoosayn," iyo habayacnimo, oo haddana markale dib ugu laabtaan halkii hore.

Waxay sida badan leeyihiin muudhadh caadi ah inta dhexdooda.

Dareenka sare waxa loo yaqaan waallida ama falnaanta.

Dareenka hoose waa niyad-jab.




Sababaha keena xaaladda bipolar disorder had iyo jeer ma cadda. Waxay ka jirtaa qoysaska dhexdooda. Qaabdhismeedka iyo shaqada maskaxda oon caadi ahayn ayey dhici kartaa inay door ka ciyaaraan.

Xaaladda bipolar disorder sida badan waxay bilaabantaa marxaladda dambe ee

dhallinyarnimada qofka ama horraanka muddakarnimada. Laakiin caruurta iyo muddakarkuba waa yeelan karaan xaaladda bipolar disorder sidoo kale. Xanuunku sida badan wuxuu si jirayaa inta la noolyahay oo dhan.

Haddii aad u malaynayso inay dhici karta inaad leedahay, u sheeg bixiyahaaga daryeelka caafimaad. Baadhitaan caafimaad ayaa yarayn kara xanuunada kale ee ay dhici karto inay kugu keenayaan isbeddelada muudheed.

Haddii aan la daawayn, xaaladda bipolar disorder waxay keeni kartaa xidhiidhada oo dhaawacmada, shaqo ama dugsi ka soo dhalaalid liidata, iyo xiitaa is-dil.



Hase yeeshee, waxa jira daawayno waxtar leh oo xakameeya astaamaha: daawo iyo daawaynta hadalka ah. Isku-darkooda ayaa sida badan ugu fiican.

Text is public domain from the MedlinePlus Health Topics Introductions series This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/us>

A Healthy Roads Media project

www.healthyroadsmedia.org

Bipolar (Somali) - Last Reviewed 2015